KA-QAYBAL WAALID

Weecinta waxa loogu talogalay qoysaska horukaca leh ee raali ka ah inay ka hortagaan arrimaha sharci ee ka imanaya dhaqanka ilmahooda. Kiisaska intooda badan Barnaamijka Weecintu waa xidhiidhkii ugu horeeyay ee qoysasku la yeesheen fulinta sharciga iyo hab cadaaladeedka dambiyada. Wax-ka-qabasho Waxtar leh oo goor hore ah oo la adeegsanayo Barnaamijka Weecinta ayaa ah hab waxtar leh oo lagu baajiyo sharci ka-hor-imaad dhaca mustaqbalka.

Weecintu waxay waalidka siisaa:

- Fursado lagu qiimeeyo farsamooyinkooda waalidnimada iyada oo gargaar laga helayo waxqabad kale.
- Fursad lagu hormariyo oo lagu hagaajiyo isgaadhsiinta ay la leeyihiin ilmahooda.

Weecinta lagu guuleysto macnaheedu waxa uu noqdaaa:

- Kiiska si rasmi ah ayaa loo xaliyay iyada oo meesha maxkamad soo galin.
- Qofka da'da yar ma laha diiwaan maxkamadeed oo ku saabsan dambiga.

Joojinta Weecinta:

Joojinta weecintu waxay keentaa in kiiska dib loogu gudbiyo hab maxkamadeedka caadiga ah si looga qaado talaabo dheeraad ah iyo dambi ku-oogis.

KHARASHKA KA-QAYBGALKA
Dambiile kasta oo da' yar waxa uu bixinayaa fii maamul oo aan soo-celin lahayn oo ah $55.00 iyo waliba wixii ah fii dheeraad ah ee ku saabsan baahidooda gaarka ah iyo barnaamijka.

10-ka Sababood ee Ugu Sareeya in la Taageero Barnaamijka Weecinta Dadka Da'da Yar

1. **Waxay dadka da'da yar ka gargaartaa inay wax ku qaataan khaladadooda iyada oo la adeegsanayo wax-ka-qabasho goor hore ah.**
2. **Waxay kabtaa dhibka loo geystay qoysaska, dhibaneyaasha & beesha.**
3. **Waxay kulmisaa waalidka, mas'uulka iyo casharo ka imana nolol maalmeedka.**
4. **Waxay u qalabaysaa kuna dhiirigalisaa dhallinta inay gaadhaan go'aamo xilkasnimo leh.**
5. **Waxay abuurtaa hab magdhow loogu ururiyo dhibaneyaasha.**
6. **Waxay dhallinta ka dhigtaa kuwo lagula xisaabtamo falalkooda waxana ay bixisaa fursado waxbarasho oo ku saabsan sameyn iyo saameyn.**
7. **Waxay dambiileyaasha ay u banaan tahay siisaa fursad ay diiwaankooda kaga dhigaan nadiif.**
8. **Waxay yareysaa culayska saaran hab maxkamaeedka & jeelasha.**
9. **Waxa loo ictiraafay inay waxtar leedahay & waxana raba sharciga gobolka ilaa 1994.**
10. **Waxay joojisaa dambiyada dhallinta.**

Janelle P. Kendall
Xeer-ilaaliyaha Degmada Stearns
Stearns County Attorney's Office
705 Courthouse Square Room 448
St. Cloud, MN 56303-4701
Teleefon: (320) 656-3880

Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada Stearns

BARNAAMIJKA WEECINTA DHALLINTA

Barbara Johnson
Takhasuslaha Barnaamijyada Weecinta

Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada
Janelle P. Kendall
Xeer-ilaaliyaha Degmada Stearns

705 Courthouse Square Room 448
St. Cloud, MN 56303-4701
Teleefon (320) 656-3880
Faakis (320) 656-6695

WAA MAXAY WEECIN?

Barnaamijka Weecinta Dhallintu (Juvenile Diversion Program) waa barnaamij ikhtiyaar ah oo ah 90 maalmood oo uu hawlgaliyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada Stearns oo dambiileyaasha da'doodu ka hooseyso 17 ½ ee barnaamijku u banaan yahay siiya beddelaad ka baajinaysa in maxkamad la hor keeno.

Weecintu waxay bixisaa Qorshe Waxqabad oo Shakhsideysan oo ku saleysan:

La-xisaabtan
- Beesha ah
- Dhibanaha ah

Naf Hagaajin
- Loo marayo xilkasnimo shakhsi

Qirasho Khalad-sameyn
- Fahmidda saameynta falalka
- Xilka khalad-sameynta oo si shakhsi ahaan la qaato
- Hirgalinta fikirka isbeddelay si loo joojiyo dhibaatooyinka mustaqbalka

HADAFYADA

- **In la joojiyo, la baabi'iyo ama la yareyo tirada dambi ku-noqoshada.**
- **In dambiileyaasha uu barnaamijku u banaan yahay la siiyo wax beddelaad u ah hab maxkamadeedka caadig ah iyo xukun dambi.**
- **In la hormariyo ururinta magdhow la siinayo dhibaneyaasha dambi.**
- **In la yareeyo kharashka iyo culayska kiisaska ee saaran maxkamadaha degmada iyo hab cadaaladeedka dambiyada .**

U-BANAANAANTA

Waa in dambiiluhu degan yahay Degmada Stearns, uu jiro da' ka yar 17 ½ oo sannadood wakhtiga dambiga, oo aanu lahayn taariikh dambi oo hore.

Dambiyada la weecin karo waxa ku jira:

- Waxyeelo Dambi-fal ah oo Loo Geysto Maal
- Xatooyada iyo Dambiyada Xatooyo la Xidhiidha (marka laga reebo xatooyo uu shaqaale kula kacay shaqo-bixiyihiisa ama qof haya jago aaminaad ama mas'uuliyad oo la mid ah)
- Haysashada/Qaadashada Maal la Xaday
- Jeegag Aan Qiimo Lahayn
- Qaribaaadda Baabuur
- Dambiyada culus qaarkood kaliya haddii uu oggalaado xeerka gobolku isla markaana uu Sarkaalka Koobaad ee Fulinta Sharciga ee aag maxkamadeedka baadhitaanka sameynayaa uu si qoraal ah talo ah ugu gudbiyay Xeer-ilaalayaha Degmada.

Dambiyada Laga Reebay waxa ku jira, balse kuma koobna: dambiyada khamriga iyo maandooriyaha ama daroogada, dambiyada qof loo geysto iyo dambiyada xaalad (status offenses).

Qodobada U-banaanaanta:

Lama oggala wax hore ama kiiskoodu socdo oo ah:

- Dambiyo Fudud ama Edeb-daro ah
- Xukun dambiyo culus
- Faro-saar ama dambiyo la xidhiidha faro-saar
- Wax aan ka badnayn laba dambi taraafig 5-tii sannadood ee ugu dambeeyay

* Go'aaminta kama-dambeysta ah ee ku saabsan in dambiilaha uu u banaan yahay barnaamijka weecintu iyo in kale waxa kaligii iska leh Xeer-ilaaliyaha Degmada Stearns *

KA-QAYBGALKA

Galista barnaamijku waxay ku saleysan tahay qirashada dambi ee dambiilaha. Waa in ka-qaybgaleyaashu qirtaan mas'uuliyad oo ay bixiyaan sidii dambigu u dhacay oo dhab ah.

TALAABO 1: Qofka dhallinta ah & waalidka ayaa ka qaybgala kulan qoris oo koox ah marka ay ogaadaan Barnaamijka Weecinta iyo waxa laga filayo.

TALAABO 2: Qofka dhallinta ah & waalidka ayaa ka qaybgala kulan u gaar ah oo ay kula kulmayaan Takhasuslaha Barnaamijyada Weecinta
- Baahida gaarka ah ee dambiilaha da'da yar ayaa la qiimeeyaa
- Heshiis Weecin oo Gaar ah ayaa la sameeyaa oo la saxeexaa.

TALAABO 3: Waa in qaybaha barnaamijka lagu dhameystiro gudaha 3 bilood iyada oo la raacayo maamulka Takhasuslaha Barnaamijyada Weecinta.

Shuruudaha Kale:

- ☑ Waa inuu ilaaliyo xidhiidhka uu la leeyahay Takhasuslaha Barnaamijyada Weecinta
- ☑ Waa inuu ahaado qof sharciga adeecsan

Qaybaha Barnaamijka ee Suurogalka ah

- ✓ Kulano waxbarasho iyo tababaro kala duwan oo aad ka qaybgashid
- ✓ Dhibanaha oo aad siisid magdhow buuxa
- ✓ Warqad ah saamaxaad codsasho oo aad qortid
- ✓ Kulano ah la-talin/daweyn oo aad ka qaybgashid
- ✓ Qoraalo/maqaalo aad soo qortid
- ✓ Shaqo adeeg beeleed oo aad qabatid
- ✓ Talaabooyin Cadaalad oo ah magdhabid